



# Daraasadaha Kale ee Midtown Corridor

Iyadoo kaashaneysa Dagmada Hennepin iyo Magaalada Minneapolis, Metro Transit waxay bilowday daraasado kale (AA) si loo tilmaamo horumarinta suurtoogalka ah ee laga gaari karo gaadiidka Midtown Corridor. Ujeedada gaadiidka Midtown Corridor waa in la horumariyo dhaqaaqa, la kordiyo rakaabka, iyo in la xoojiyo xariirka gaadiidka taasoo lagu gaaro adeegga gaadiidka tayada sare, dhaqaaqa badan, iyo adeegga gaadiidka leysku haleyn karo ee ka jira jidkaan ganacsiga gaadiidka ku badan yahay.

## Maxay tahay ujeedada Midtown Corridor AA?

Ujeedada AA waxay tahay in la tilmaamo oo daraasad lagu sameeyo manafaacaadka, kharashka, iyo saameynta la xariirta gaadiidka kala duwan ee suurtoogalka ah ee ka jira Midtown Corridor. Macluumaadkaan waxay nagu kaalmeyn doonaan in aan fahamno sida gaadiidka u hagaajin karo adeegga gaadiidka, sida uu u kordhin karo raacidda, taasoo dhiirigeliso horurmarka iyo isku filnaanta deegaanka, gudaha deegaanka magaalada.

## Maxay hababka gaadiidka iyo jidadka lagu sameyn doono daraasadda Midtown Corridor AA?

Hababka gaadiidka la tixgelin doono qorshahaan AA waxaa ka mid ah baska, metro, gaadiidka baska orodka badan (BRT), jidadka loogu talagalay baska

iyo gaadiidka treenka fudud (LRT). Labada waddo ee lagu sameyn doono daraasadda waa Lake Street iyo Midtown Greenway ee Koofurta Minneapolis.

## Maxay tahay natiijada laga filaayo Midtown Corridor AA?

AA waxay dhalin doontaa xulashada talo kale oo sida ugu wanaagsan la kulanta baahida gaadiidka bulshada deegaanka xagga sida ay farsamo ahaan suurtoogal u tahay, kharashka, iyo manafaacaadka. Tan waxaa badanaa lagu magacaabaa talada deegaan ahaan la jecel yahay, ama LPA. AA waa talaabada kowaad oo lagu helo maalgelinta federaalka siiyo mashruuca gaadiidka.

## Maxay tahay hawsha daraasadda ee lagu aqoonsado LPA?

Hawlaha daraasadda waxaa leysugu geyn karaa afar maraxalad oo waaweyn:

1. Bilowga mashruuca, halkaas oo lagu soo saari doono oraaah dhamaystiran oo ku saabsan dhibaataada jirta, iyo himilooyinka iyo ujeedooyinka si loo gaaro xalal suurtoogal ah.
2. Shaqada hore iyo baarista dallada talooyinka kale
3. Toostoosinta iyo qiimeynta tafatiran ee ku saabsan talooyinka ugu fiican
4. Qiimeynta ugu dambeyso talooyinka kale iyo horumarinta talooyinka la soo jeediyo



Metro




BRT



Jidadka loogu talo galay baska




LRT (Treenka Magaalada)





## Intee ayay qaadan doontaa in lagu dhamaystiro Midtown Corridor (AA)?

Midtown Corridor waxay qaadan doontaa saddax marxalado. Waxaa la filaa in hawsha AA qaadan doonto qiyaas ahaan 18 bil si loo dhamaystiro. Waxaa hoos lagu muujiyay jadwalka la soo jeediyay ee ku saabsan Midtown Corridor AA.



## Sidee ayaan xogogaal u nogon karaa iyo sidaa ayaan lug ugu yeelan karaa?

- Tag guriga furan
- Booqo bogga internetka: [www.midtowntransitway.org](http://www.midtowntransitway.org)
- Nagala soco Facebook: [www.facebook.com/metrotransitm](http://www.facebook.com/metrotransitm)
- Ama nagala soco Twitter: @metrotransitm
- Ha laguu soo diro email ku saabsan wararkii ugu dambeeyay: [midtown@metrotransit.org](mailto:midtown@metrotransit.org)



Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah:

Michael Mechtenberg  
[midtown@metrotransit.org](mailto:midtown@metrotransit.org)  
 612-349-7793



# Daraasadaha Kale ee Midtown Corridor

## Maxay tahay ujeedada Mashruuca Gaadiidka Midtown Corridor?

Ujeedada Mashruuca Gaadiidka Midtown Corridor waa in la bixiyo adeegga gaadiid tayo sare, u roon rakaabka, la kulma baahida iminka jirta iyo tan mustaqbalka, soo jiidata rakaab cusub iyo taageerta koriimo la xajin karo iyo horumarka agagaarka jidka.



## Maxay tahay sababta gaadiidka loogu baahan yahay Midtown Corridor?

La'aanta adeegga gaadiid leysku haleyn karo oo soo jiita rakaabka


Adeegga baska Lake Street waxaa hortaaan baabuurta tartiibka u socota iyo isku haleynta oo liidata. Nalalka iyo dib u dhaca ku yimaada raacidda macaamiisha waa qodob muhiim ah oo wax ku biiriya adeegga tartiibka u socda, halka meelaha baska joogsado ee ku yaala jidka waxaa kaloo ka maqan waxyaabaha taakuleeyo rakaabka. Waxaa loo baahan yahay horumarinta adeegga gaadiidka iyo waxyaabaha taakuleeyo rakaabka si loo helo gaadiid kale oo la tartama baabuurka yar kuna dhiiri geliya dad badan in ay gaadiidka u raacaan safarada ay ku tagaan shaqada iyo safarada kale.


Xarumaha laga raaco iyo meelaha muhiimka ah ee la tago

Waxaa loo baahan yahay in la hagaajiyo tagidda xarumaha shaqada, gudaha iyo dibadda jidka labadaba. Inta ay sii socdaan kala fogaanta sasaanka safarada gobolka, gaadiidka waa in uu ahaado mid in badan rakaabka u soo jiidata safarada lagu tago suuqyada soo koraaya ee aan ku aalin magaalada hoose. Hagaajinta xariirka bari-galbeed ee lagu sameeyo gaadiidka iminka jira iyo midka qorsheysan waxay quwad ka dheex dhalin kartaa shabakadana koreysa ee socodka badan, awoodda sare gaadiidka gobolka.

Tirada dadka badan ee isku haleeya gaadiidka

Daraasadda agagaarka Midtown Corridor waxaa ku sugan tiro dad badan oo isku haleeya in uu yahay habka ugu muhiimsan gaadiidka. Daraasad lagu sameeyay tirada dadka ku sugan agagaarkaas waxay muujisay in tirada baabuurta ay leeyahiin dadka daggan jidkaas ay, boqolkiiba 30 halkii wadde ka yar tahay, tirada baabuurta ay leeyahiin waddeyaasha daggaan magaalada hoose inteeda kale. Astaantaan waxay muujisaa in dad badan oo ku sugan jidkaas isku haleyaan gaadiidka. Jidkaas waxaa looga baahan yahay gaadiid la hagaajiyay si loo wanaajiyo adeegga dadkaan.





### Wax ka qabashada baahida gaadiidka Midtown Corridor, ujeedooyinka daraasadda waxay tilmaami doontaa maal gelinta gaadiidka si loo:

1. Kordhiyo isticmaalka gaadiidka dadka daggan jidka iyo dadka soo booqda
2. Horumariyo dhaqaaqa gobolka iyo si loo horumariyo tagidda shaqooyinka iyo hawlaha
3. Kiciyo loona taageero horumarka dhaqaalaha jidka
4. Horumariyo gaadiid dhaqaaleeya kharashka oo si wanaagsan ugu meeleysan fulinta
5. Taageero bulsho caafimaad qabta lana hagaajiyo jawiga, guud ahaan.



### Sidee ayaan xogogaal u nogon karaa iyo sidaa ayaan lug ugu yeelan karaa?

- Tag guriga furan
- Booqo bogga internetka: [www.midtowntransitway.org](http://www.midtowntransitway.org)
- Nagala soco Facebook: [www.facebook.com/metrotransitm](http://www.facebook.com/metrotransitm)
- Ama nagala soco Twitter: @metrotransitm
- Ha laguu soo diro email ku saabsan wararkii ugu dambeeyay: [midtown@metrotransit.org](mailto:midtown@metrotransit.org)



Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah:

Michael Mechtenberg  
[midtown@metrotransit.org](mailto:midtown@metrotransit.org)  
612-349-7793